

TAAGEERIDA QOYSKA

- Taageerida Qoyska:** Noolasha qoyska ayaa bixisa heerarka saree ee taageerida iyo jacaylka dhalinta.
- Xiriirka Wanaagsan Ee Qoyska:** Marka uu wanaagsanaado xiriirka waalidka iyo dhalinyartu waxaa bilaabmata in dhalinyartu waydiistaan waalidka talooyin iyo la'tashi wacan.
- Xiriirka Dadka Kale Ee Waawayn:** Dhalinyartu waxay kaloo waanooyin ka qaataan dadka waawayn.
- Dariska Wanaagsan:** Dhalinyaradu waxay kaloo ka tusaala qaataan dariska wanaagsan.
- Dugsiyada Wanaagsan:** Dugsiyadu waxay bixiyaan dhiiragelin iyo jacayl wanaagsan.
- Waalidka Oo Ku Lug Lahaado Dugsiyada:** Waalidku kaalin wayn ayuu ku leeyahay inuu ardaygu ku guuleesto waxbarashada iskuulka.

AWOODSIINTA

- Qiimaha Ee Ku Leeyihiin Bulshada:** Dhalinyaradu way ku faraxdaa markii ay arkaan in bulshada laga jecelyahay.
- Dowrka Dhalinyarta:** In dhalinyartu loo dhiibo jagooyinka sare ee bulshada.
- Iskaa Wax u Qabso:** In dhalinyartu la baro inay saacado ku bixiyaan u shaqeenta bulshada.
- Amaanka:** Dhalinyartu waa inay dareemaan in amaankooda guriga iyo dugsiga uu suganyahay.



SOOHDIMAHA LAGA FILAAYO DHALINYARTA

- Sharciga u Degsan Qoyska:** Qoysku waa inuu leeyahay sharci looga dhaqmo guriga oo ku saabsan dhalinyarta.

- Sharciga u Yaala Dugsiga:** Dugsigu waxuu bixiyaa xeerar cad-cad iyo cawaaqibtooda.
- Sharciga u Degsan Dariska:** Darisku waa inay iska saaraan masuuliyad xoogan la socodka hab dhaqanka dhalinyarada.
- Ku Dayashada Wanaagsan:** Waalidka iyo dadka waa wayn waa inay u muujiyaan dhalinyarada ku dayasho wanaagsan.
- Saaxiibka Wanaagsan:** Dhalinyaradu waxay fiirsataa saaxiibka wanaagsan qaabka uu u dhaqmo.
- Filashooyinka Sare:** Waalidiinta iyo macalimiinta waa inay ku dhiirageliyaan dhalinyarta inay ka filayaan natiijooyin wanaagsan.

WAXDHISKA ISTICMAALKA WAQTIGA

- Howl Abuurka:** Dhalinyarada waxay waqti sadex saac geliyaan ciyaaraha, farshaxanka iwm.
- Barnaamijyada Dhalinyarta:** Dhalinyartu waxay waqti dheeraad geliyaan isbuuc kasta ciyaaraha, u shaqeenta bulshada iyo kooxa kale oo kala duwan.
- Bulshooyinka Diimaha:** Dhalinyarada waxay waqti dheeri ah geliyaan meelaha lagu baro macaahida diimaha.
- Waqtiga Guriga:** Dhalinyaradu waxay waqtigooda ku "dhumiyaan" saaxiiba dooda kale toddobaadkii halmar ama laba jeer.

HEEGAN U AHAANSHAHA WAXBARASHADA

- Guulaha Waxbarasho:** Dhalinyartu way ku farxaan markii ay waxwanaanagsan sameeyaan dugsiga.
- Howl gelinta Dugsiga:** Dhalinyartu waa in la howl geliyaa markasta ka qayb qaadashada waxbarasho.
- Shaqada Guriga:** Dhalinyaradu waxay sheegaan inay hal saac iyo ka badan ee ka shaqeeyaan cashirkooda.
- Jeclaanshaha Dugsiga:** Dhalinyartu waa inay daneenayaan waxbarashada iskuulka.
- Wax Akhriska Madadaalada Ah:** Dhalinyartu waxay waqti ku bixiyaan akhriska buugaagta.

KA WADA SHAQEENTA WANAAGA

- Naxariista:** Dhalinyartu waxay aad u jecelyihiin inay caawiyaan dadka kale.
- Cadaalada Iyo Sinnaanta:** Dhalinyartu waxay jecelyihiin wax u qabadka ummada iyo in caddaalad lagu wada shaqeeyo.
- Aaminaad:** Dhalinyaradu waa ina labaraa sidii ay isugu taagi lahaayeen shakhsiyaad kooda.
- Daacadnimo:** Dhalinyaradu "waxuu sheegaa runtaa xitaa haddii ee ku adagatahay."
- Masuuliyad:** Dhalinyaradu ah waxuu kasoo baxaa shakhsiyaadka masuuliyadeed ee saaran.
- Xakamaynta:** Gofka dhalinyaradu waxuu aaminsan yahay inuu ka adkaadaan shahwooyinkooda iyo isticmaalka khamriga, mukhaadaraadka iwm.

KARTIDA BULSHADA

- Qorsheenta Iyo Go'aan Qaadashada:** Qofka dhalinyaradu waxuu ogyahay inuu go'aano wanaagsan qaadan karo.
- Aqoon Shakhsiyadeed:** Qofka dhalinyaradu ah waxuu leeyahay damqasho dareen iyo naxariis iyo xirfadaha saaxiibtinimo.
- Kartida Dhaqameed:** Qofka dhalinyaradu waxuu aqoon u leeyahay la dhaqanka qowmiyadaha kala duwan iyo isrhooda.
- Ka Adkaanshaha Nafta:** Qofka dhalinyaradu waxuu ka adagyahay waxyaalaha qatarta u keenaya naftiisa.
- Nabad u Xalinta Khilaafaadka:** Qofka dhalinyaradu waxuu aamin sanyahay in nabad lagu xaliyo khilaafaadka.

AQOONSIGA FIICAN

- Awooda Shakhsiyadeed:** Qofka dhalinyaradu waxuu ka adag yahay waxyaabaha naftoodu la kulanta.
- Kalsoonida:** Qofka dhalinyaradu waxuu soo sheegaa inuu isku kalsoonyahay markasta.
- Qorshaha Noolasha:** Qofka dhalinyaradu waxuu soo gudbiyaa in "noolashu leedahay qorsho fiican."
- Mustaqbal Wanaagsan:** Qofka dhalinyaradu waxuu aamin sanyahay in noolashu leedahay mustaqbal wanaagsan.

